

## **Sharci L. 6 - 10 Febrauyo 1962**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA  
Isagoo tixgeliyey ansaxidda Golaha Qaranka.  
SOO SAARAYA**

Sharciga soo socda;

### **Qod. 1**

#### **Dil ula kac ah**

Qof kasta oo si ula kac ah u geysta dil qof kale waxa lagu ciqaabaya cadaab dil ah. Haddii dembiilaha yahay mid (ascendant), ciqaabta waa xabsi toban ilaa shan-iyo-toban sanadood.

### **Qod. 2**

#### **Oggolaashaha dilka**

Qof kasta oo geysta dil qof, oggolaashihiisa, waxaa lagu ciqaaba xabsi muddo lix bilood ilaa shan-iyo-toban sanadood.

Waxaa lagu dabaqaa ciqaabta dilka haddii dhacdada lagu sameyey;

- 1) Qof da'diisa ka yartahay 18 sanadood;
- 2) Qof la dhimirka;
- 3) Qof oggolaashihiisa dembilaha si xoog ah ka khasba, handada ama waswaasiya, ama baada si khiyaano ah.

### **Qod. 3**

#### **Dil sharaf darteed**

Qof kasta oo geysta dil xaaskiisa, gabadhiisa ama walaashiisa, markuu ku qabto fal dembiyeed xiriir galmo iyo markuu xanaaqsan yahay eek a dhalatay qofka loo geystay sharafkiisa iyo qoyskiisa, waxaa lagu ciqaaba xabsi shan ilaa toban sanadood.

Isla ciqaabtaas waxaa galaaya qofkii, xaaladaha la soo sheegay, sababa dhimashada qof xiriir galmo sharcidarro ah xaaskiisa, gabadhiisa ama walaashiisa.

### **Qod. 4**

#### **Dilid uurkujir sharaf awgeed**

Qof kasta oo sababa dhimashada cunug isla markiiba dhalashada, ama uurjiifka muddada dhalmada, si uu u badbaadiyo sharafkiisa ama mid faraciisa hoose iyo mid faraciisa sare, waxaa lagu ciqaabaya xabsi toban ilaa shan-iyo-toban sanadood.

Isla ciqaabtaas waxaa galaaya kuwa ka qeybqaato arrintaas.

### **Qod. 5**

#### **Dil kas dhaaf ah**

Qof kasta, tallaabooyin ku aadan inuu ku kaco dembi garaacid ama dembi keenaayo dhaawac jir ahaan, keena dhimashada qof, waxaa lagu ciqaabaya xabsi toban ilaa shan-iyo-toban sanadood.

### **Qod. 6**

#### **Fulinta ciqaabta dilka ah**

Ciqaabta dilka ah waxaa lagu fulinaa toogasho dhismaha xabsiga ama meel kale uu cayimay wasiirka cafiska iyo cadaaladda.

Fulinta ciqaabta dilka dib bay u dhacay;

- 1) Marka la keeno codsiga cafiska iyo inta ay ka soo baxayso isla jawaabteeda;
- 2) Marka ay lid ku tahay naag uur leh iyo inta ay socoto xaaladda uurka;
- 3) Marka ay lid ku tahay naag dhashay muddo ka yar sannad, marka laga reebo in canuga dhinto ama lagu wareejiyey xanaanadiisa qof kale iyo dhalmadda ku timaado laba bilood waxaan ka yareyn.

### **Qod. 7**

Waxaa la tirtiray qodob kasta ee aan la socon Karin sharcigan. Waxna lama cusbooneysiin eek u saabsan habdhaqanka dembi wadareedka dadka gala, dembiyada wadajirka, duruufaha reeba iyo duruufaha fududeeya iyo cusleeya.

### **Qod. 8**

#### **Dhaqangalka sharciga**

Sharcigan wuxuu dhaqangalaaya maalinta shan-iyo tobanaad ee xigta ku baafintiisa faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Taariikhda – Muqdisho, maalinta 10ka bisha febraayo 1962.

Raisul wasaaraha

CABDIRASHID CALI SHARMARKE

Wasiirka Cafiska iyo Cadaaladda

MAXAMUD AXMED MOHAMED AADEN

Aden Abdulle Cusmaan